



## Baaritaannada eegidda ee adiga iyo ilmahaaga

Macluumaad muhiim ah oo ku saabsan xulashooyinka baaritaan ee aad helayso waqtiga uurka iyo kaddib








Buug-yarahan wuxuu ku siinayaa macluumaad ku saabsan eegidda baaritaanka lagu siinayo waqtiga uurkaaga iyo kaddib marka ilmahaagu dhasho. Wuxuu sharaxayaa noocyada kala duwan ee eegid iyo waxa eegidda lagu ogaanayo.

Waxaan rajaynaynaa in akhrinta buug-yarahan ay kaa caawin doonto u diyaargarowga kala hadalka umilisadaada ama dhakhtarka si ay aad u waydiin karto su'aalaha muhiimka kuu ah. Way fiican tahay inaad haysato buug-yaraha marka aad ayaga la kulmayso. Waa adiga go'aankaaga haddii aad samaynayso iyo haddii kaleba eegidaha lagu sheegay buug-yarahan.




# Tusamada

**Waxa aad u baahan tahay inaad ka ogaato arrinta baaritaanka**

## **Baaritaannada eegidaha ee waqtiga uurkaaga**

 Cudurrada faafa	6-7
 Sickle Cell iyo Thalassaemia	8-11
 Calaamadaha Down's, Edwards' iyo Patau's	12-16
 Qaab jidheed aan caadi ahayn (masawirka waqtigaha bartamaha uurka)	17-19
 Dhibaatooyinka indhaha ee dumarka macaanka qaba	20-22

## **Baaritaannada eegidda ee ilmahaaga dhashay**

 Wadnaha, indhaha, miskaha iyo xiniinyaha (baaritaan qaab jidheed)	23-24
 Lumitaan maqal	25-26
 Dhibic dhiig - Blood spot	27-30

## Hordhac

### Waxa aad u baahan tahay inaad ka ogaato arrinta baaritaanka

#### Waa maxay baaritaannada eegidaha?

Baaritaannada eegidaha waxaa loo isticmaalaa ogaanshaha dadka ku sugan khatar sare oo dhibaato caafimaad. Tani macnaheedu waa inay heli karaan daawayn xilli hore ah, aad waxtar u leh, ama lagu wargeliyo go'aannada ku saabsan caafimaadkooda. Way caawin kartaa in lagu matalo baaritaanka sidii ayadoo dadka la dhexmarinayo shaandho. Dadka inta badan way ka gudbaan laakiin tiro yar ayay qabataa shaandhada. Dadka ay qabato shaandhadu waa kuwa loo tixgeliyo inay ku sugan yihiin khatar aad u sarraysa dhibaato caafimaad ee laga baarayo.

Baaritaannada eegiduhu ma ahaan kuwa wada sax ah. Dadka qaar ayaa loo sheegi doonaa in ayaga ama ilmahoodu ay khatar sare ugu sugan yihiin dhibaato caafimaad iyadoo xaqiiqdii aysan qabin dhibaato. Sidoo kale dad yar ayaa loo sheegi doonaa in ayaga ama ilmahooda ay ku sugan yihiin khatar hoose ee dhibaato caafimaad iyadoo xaqiiqdii ay qabaan dhibaato.

**Lammaanayaasha waxaa lagu soo dhawaynayaa imaatinka kulamada**

#### Waa maxay faraq u dhexeeya baaritaanka eegidaha iyo eegidaha wax-la-ogaaday (diagnostic tests)?

Baaritaan eegid wuxuu ogaan karaa haddii adiga, ama ilmahaaga aad khatar sare ama hoose ugu sugan tihiiin dhibaato caafimaad. Laakiin caadiyan kuuma sheegi karto xaqiiqda, sidaas darteed dadka lagu helo inay ku sugan yihiin khatar sare ee dhibaato caafimaad waxaa inta badan la siiyaa baaritaan labaad. Tani waxaa loogu yeeraa eegidaha wax-la-ogaaday waxayna bixisaa jawaab ugu dambayn ah 'haa' ama 'maya'.

#### Baaritaannada eegidaha waqtiga uurka iyo kaddib

Waxaa lagu siin doonaa baaritaanno eegid waqtiga uurka si la isugu dayo ogaanshaha wixii dhibaato caafimaad ah taasoo saamayn karta adiga ama ilmahaaga. Baaritaannadu waxay kaa caawinayaan samaynta kala xulashooyin ku saabsan daryeelka ama daawaynta waqtiga uurkaaga ama kaddib markii ilmahaagu dhasho. U **taariikhaynta baaritaanka raajada-dhawaqa**, ee la bixiyo qiyaastii marka uurku yahay 8-14 usbuuc, waa qaabka ugu saxan ee lagu xisaabin karo taariikhda ilmuhu dhalanayo. Si loo eego qaab jidheed aan caadi ahayn ee ilmaha.

Qaar baaritaannada eegidaha ayaa la siinayaa ilmahaaga isla marka uu dhasho/dhalato wax yar kaddib Waxaanu bixinaa kuwaan si ilmahaaga loo siiyo daawayn ku haboon sida ugu dhaqso badan haddii loo baahdo.

#### Qaar arrimaha dhaca

Haddii aad garanayso adiga, aabaha ilmaha, ama xubin ka mid ah qoyska ay horeba u qabaan dhibaato caafimaad oo laga baaray, fadlan u sheeg umulisaada.

Haddii aad ka guurto guriga inta aad sugayso jawaabaha wixii baaritaan eegid ah, fadlan cinwaankaaga cusub u sheeg umulisaada ama soo-booqdaha caafimaad.

## **Miyay tahay inaan sameeyo baaritaan eegid?**

Haddii la samaynayo baaritaan eegid iyo haddii kaleba mar kasta waa xulusho shaqsiyadeed oo adiga kaligaa aad gaari karto. Waxaad kala hadli kartaa mid kasta oo baaritaannada eegidda ah ee lagu siiyay xirfadlahaaga caafimaad iyagoo go'aaminaya, iyadoo ku salaysan adiga xaaladaada, haddii ay kugu haboon tahay iyo haddii kaleba.

Qaar ka mid ah baaritaannada eegid ee buug-yarahan lagu sharaxay sida baaritaanka dhiigga ee cudurrada faafa, baaritaan indhaha haddii aad macaan qabto, iyo baaritaannada ilmaha dhashay ayay ku talinaysaa Hay'adda Caafimaadka Qaranka (NHS). Tani sababteedu waa in maxsuullada baaritaannadan ay kaa caawin karaan xaqiijinta in adiga ama ilmahaaga aad daawayn degdeg ah u heshaan wixii dhibaatooyin daran ah.

Baaritaannada eegidaha ee uurka ee cudurka unugga xinjirowga dhiigga iyo thalassaemia, calaamadaha Down's masawirka bartamaha uurka waxay keeni karaan go'aanno adag sida in la sameeyo baaritaan wax-la-ogaaday iyo haddii kale taasoo leh khatar ilmo-dilan.

Baaritaannada wax-la-ogaaday waxay keeni karaan go'aan ah haddii uu sii soconayo iyo haddii la dhammaynayo uurkaaga. In la sameeyo baaritaan dheeraad ah ama dhammaynta uurka waa go'aan aad adigu leedahay mar kasta iyadoo xirfadlayaasha caafimaad ay ku caawin doonaan , wax kasta oo aad go'aansato. Waxaa laga yaabaa inaad doonayso inaad si taxadar leh uga fikirto haddii aad samaynayso baaritaannadan eegidda iyo haddii kale.

## **Baaritaanka iyo NHS**

Hay'adda NHS waxay go'aaminaysa baaritaannada eegidda ee ay bixinayso taasoo ku salaysan caddaymo wanaagsan . Koox khuburo ah oo lagu magacaabo Guddiga Baaritaanka Qaran ee Boqortooyada Biritayn (United Kingdom National Screening Committee (UK NSC)) ayaa waxay talo siiyaan hay'adda NHS.

Dhammaan baaritaannada eegid ee ay bixiso hay'adda NHS waa lacag la'aan. Qaar ka mid shirkadaha gaarka ah ayaa sidoo kale bixiya baaritaannada eegidda kuwaasoo ay tahay inaad lacag bixiso. Hay'adda NHS ma ballan qaadi karto tayada baaritaannada gaarka ah. Talo-bixin dheeraad ah ayaa laga helayaa

<https://www.gov.uk/guidance/private-screeningfor-health-conditions-nhs-recommendations>

**Haddii baaritaankaaga caadiga ah ee dheecaanka uu soo dhow yahay inta aad uurka leedahay – waxaad dib ugu habaysan kartaa 12 usbuuc kaddib dhalidda**

## **Xog-xajin**

Sharci ahaan, qof kasta oo ka shaqeeya, ama matala, hay'adda NHS waa inuu xushmeeyaa waxa kuu gaarka ah uuna u xafidaa dhammaan macluumaadkaaga si ammaan ah. Dastuurka hay'adda NHS wuxuu sheegayaa sida ay tahay in hay'adda

NHS ay ula macaamisho diiwaankaaga si loo dhawro waxa kuu gaarka ah. Intaas waxaa dheer waxaa jira sharciyo xaqiijinaya in xog-xajinta la meellmariyay.

Diiwaannada baaritaannada waxaa kaliya lala wadaagayaa shaqaalaha u baahan inay arkaan. Hanaan-hawleedkan waxaa loo maamulaa si adag Mararka qaar macluumaadka waxaa loo isticmaalaa xisaab-xir iyo cilmi-baaris si loo hagaajiyo maxsuullada baaritaannada iyo adeegyada. Macluumaad ayaa lagu siinayaa markii lagu baaro.

### **Caawinaad dheeraad ah**

Liiska hay'adaha bixin kara caawinaad dheeraad ah ee ku saabsan wixii xaalado lagu xusay buug-yarahan, fadlan eeg [www.screening.nhs.uk/support-organisations](http://www.screening.nhs.uk/support-organisations).

## Cudurrada faafa

[nhs.uk/infectiousdiseases](https://nhs.uk/infectiousdiseases)

### Maxaa loogu talagalay baaritaanka eegidda?

Si loo ogaado haddii aad qabto hepatitis B, HIV (human immunodeficiency virus), ama syphilis.

Dumarka horeba loogu oga inay qabaan HIV ama hepatitis B waxay u baahan yihiin ballamo hore loo samaysto oo dhakhtar takhasus ah si loo qorsheeyo daryeelkooda uurka.

### Ku saabsan xaaladahan

Hepatitis B iyo HIV waxaa lagu gudbiyaa dhiig iyo dheecaannada jirka ee qaab isku-tag galmo ama cirbado cudurka wata. Fayrasyadan sidoo kale waxay hooyadu u gudbin kartaa ilmaha.

**Hepatitis B** fayrasku wuxuu saameeyaa beerka wuxuuna keeni karaa caafimaad-darro degdeg ah (degdeg) iyo mid joogto ah (waqti-dheer). Daryeel takhasus khaas ah leh ayay u baahan yihiin dumarka uurka leh ee qaba hepatitis B. Tallaalka ilmaha ee sannadka ugu horreeya wuxuu si aad ah u yaraynayaa khatarta in ilmaha uu ku soo baxo hepatitis B.

**HIV** wuxuu daciifinayaa nidaamka difaac ee jirka taasoo ay ku adkaanayso inuu la dagaalo cudurrada. Waxay markiiba keeni kartaa cudurka AIDS (acquired immune deficiency syndrome). Haddii aan la daawayn, waxay hooyadu qaadsiiin kartaa ilmaha waqtiga uurka, markii ay dhalayso ama markii ay nuujinayso. Daawaynta waqtiga uurka waxay aad u yaraynaysaa khatarta in HIV u gudbo ilmaha iyadoo ka yaraysa 4tiiba 1 (25%) una yaraysa wax ka yar 100kiiba 1 (1%).

**Mahad ha ka gaadho baaritaanka, Ingiriiska waxay hadda ku sugan tahay heerkii waligeed ugu hooseeyay ee isku-gudbinta hooyo-ilaa-ilmu ee cudurka HIV**

**Syphilis** waa cudur la isugu gudbiyo galmada. Waxay hooyadu u gudbin kartaa ilmaha waqtiga uurka. Haddii aan la daawayn, waxay u keeni kartaa dhibaato caafimaad aad u daran ilmaha ama soo-dilan ilmaha uurka ku jira ama ilmo mayd ahaan ku dhasha.

### Muxuu ka kooban yahay baaritaanku?

Waxoogaa dhiig ahaa ayaa laga qaadayaa gacantaada.

### Miyaa baaritaankan dhibaataynayaa aniga ama ilmahayga?

Ma jiraan wax khataro ah oo la xiriira baaritaanka.

### Miyaan u baahanahay samaynta baaritaankan?

Baaritaannadan waa lagu talinayaa si ay u dhawraan caafimaadkaaga ee qaab daawayn iyo daryeel xilli hore ah iyadoo si aad ah u yaraynaysa khatarta u gudbinta cudur ilmaha, lammaanaha ama xubnaha kale ee qoyska.



## **Maxaa dhacaya haddii aan go'aansado inaanan samayn baaritaanka eegiddan?**

Waxaa dib lagu siin doonaa baaritaan uurka dhammaadkiisa, qiyaastii 20 usbuuc. Waxaa lagu baari karaa ilaa dhalashada ilmaha. Waxaad waydiin kartaa umulisadaada ama GP-gaaga dib-u-eegid ah hepatitis B, HIV ama syphilis waqti kastaba haddii aad badasho lammaanahaaga galmada ama u malaynayso inaad khatar ku sugan tahay.

## **Maxsuullada macquulka ah**

Eegiduhu waxay kuu sheegayaan haddii aad qabto mid ka mid ah cudurradan.

Haddii aad qabto **hepatitis B** waa muhiim in kooxo takhasus leh ay kormeeraan caafimaadkaaga uurka iyo kaddib marka ilmuhu dhasho. Lammaanahaaga iyo wixii carruur kale ah waxay u baahan karaan baaritaan iyo tallaal. Si looga hortago in ilmaha uu ku dhaco hepatitis waxay u baahan yihiin iyo tallaalo:

- 24 saac gudahood kaddib dhalashada
- da'da hal bil jir
- da'a laba bilood jir
- tallaal ugu dambeeya ee da'da hal sano jir la qaadayo eegid dhiig si loo baaro haddii laga hortagay cudur.

## **Ilmahaaga u baahan yahay tallaalka hepatitis B, xaqiiji inaad hesho**

Aad ayay muhiim u tahay in ilmuhu qaato dhammaan afarta cabbir ee tallaalka si loo dhawro caafimaadkooda. Waydii GP-gaaga, kalkaaliyaha caafimaad ama booqdaha caafimaad xaqiijinta in ilmahaagu qabo kuwan haddii loo baahdo.

Haddii aad qabto **HIV** waxaad aad u yarayn kartaa khatarta u gudbinta HIV ee ilmaha iyadoo wadata takhasus daryeel iyo daawayn, daawooyin, daryeel qorshaysan ee ilmahaaga, iyo inaanan naas la nuujinin.

Haddii aad qabto **syphilis** u gudbin degdeg ah ee koox takhasus ayaa loo baahan yahay. Daawayntu caadiyan waa qaadasho antibiyootiik. Kuwani waa u aamaan ilmaha. Kooxdu waxay sidoo kale siin doonaan baaritaan lammaanahaaga si loo eego haddii ay u baahan yihiin daawayn. Ilmuhu wuxuu u baahanayaa baaritaano iyo imtixaano dhiig kaddib dhalashada waxayna u baahan karaan anti-biyootiik.

Ilmuhu wuxuu u baahan karaa antibiyootiik kaddib dhalashada.

## **Waxaad waydiisan kartaa dib-u-eegid waqti kasta haddii aad u malaynayso inaad khatar ugu jirto mid kasta oo cudurradan ah**

## **Helitaanka maxsuulladayda**

Maxsuullada waxaa caadiyan laga doodayaa ka hor ama waqtiga xiga ee booqashadaada dhalmada iyadoo lagu diiwaan gelinayo faylkaaga.

Xirfadle caafimaad ayaa kula soo xiriiri doona haddii lagaa helo baaritaanka eegidda maxsuul ah inaad qabto cudurka HIV, syphilis ama hepatitis B si laguugu habeeyo ballan si looga wada-hadlo maxsuullada iyo u gudbinta adeegyo takhasus.

## Sickle Cell iyo Thalassaemia

[nhs.uk/sct](https://www.nhs.uk/sct)

### Maxaa loogu talagalay baaritaanka eegidda?

Si aad u ogaato haddii aad tahay qof wada sickle cell ama thalassaemia oo sidaas darteed laga yaabo inaad u gudbisno ilmaha.

### Ku saabsan xaaladahan

Cudurka Sickle cell (SCD) iyo thalassaemia waa kuwa aad u daran, cudurro dhiig la kala dhaxlo. Waxay saameeyaan haemoglobin, qayb ka mid ah dhiigga ee u kala qaada ogsijiin qaybaha jirka. Dadka qaba xaaladahan waxay u baahan yihiin daryeel takhasus oo noloshooda oo dhan ah.

**Waxaa ugu wanaagsan inaad samayso baaritaanka ka hor intaan uurkaagu gaadhin 10 usbuuc**


Dadka qaba cudurka SCD waxay la kulmi karaan weeraro xanuun aad u daran, waxaa ku dhici kara cudurro aad u daran, oo nolosha khatar ku ah, caadiyana waa anaemic (jirkooda waxaa dhib ku ah hawada ogsijiin u kala gudubkeeda). Ilmaha qaba SCD waxay heli karaan daawayn waqti horeba ah, ay ku jirto tallaaliid iyo antibiyootiik, taasoo, ay weheliso caawinta waalidkooda, ka caawinaysa ka hortagga cudurro aad u dardarn una oggolaanaysa ilmaha inuu ku noolaado nolol caafimaad leh.

Dadka qaba cudurka thalassaemia major aad ayay u yihiin anaemic waxayna u baahan yihiin in dhiig lagu shubo 4 ilaa 6 usbuuc kasta iyo cirbadayn iyo daawayn noloshooda oo idil. Waxaa sidoo kale jira, kuwa aan u badnayn, khatar yar oo cudurrada haemoglobin ah oo la heli karo.

Sickle cell iyo thalassaemia waa cudurro la iska dhaxlo oo ay waalidiintu u gudbiyaan carruurta iyagoo u marinaya unugyo aan caadi ahayn oo haemoglobin ah. Unugyada hiddahu waa astaamo ku jira jirkeena oo arrimaha sida midabka indhaha iyo nooca dhiigga. Unugyada hiduhu waxay u u shaqeeyahaan laba-laba. Wax kasta oo aan dhaxalno waxaan ka helnaa hal unug-hidde oo ka socda hooyada iyo hal ka socda aabaha.

Dadku kaliya waxay qaadaan sickle cell ama thalassaemia haddii ay dhaxlaan unugyo-hidde aan caadi ahayn ee haemoglobin – hal dhinaca hooyada ah, iyo hal dhinaca aabaha ah. Dadka dhaxla kaliya hal unug-hidde aan caadi ahayn waxaa loo yaqaan ‘sidayaal -carriers’ (dadka qaar waxay tan ugu yeeraan inay qabaan ‘trait’). Sidayaasha way caafimaad qabaan mana qabaan cudurka, in kasta oo la kulmi karaan xaalado dhibaato taasoo jirkoodu uusan helin hawada ogsijiin oo ku filan, tusaale ahaan, inay ku dhacdo anaesthetic.

**Labada waalidba waa inay ahaadaan sidayaal si ilmahaaga ay u saameeyaan**





Markii **labada waalidba** ay sidayaal yihiin cunug kasta wuxuu helayaa:


- fursad ah 4tiiba 1 (25%) ee inuusan saamayn – ilmuhu ma qaadayo ama ma sidayo cudurka
- fursad ah 4tiiba 1 (25%) ee inuu dhaxlo labada unug-hiddeba ee haemoglobin aan caadiga ahayn uuna qaado cudurka haemoglobin
- fursad 4tiiba 2 (50%) ee dhaxlidda hal unug-hidde haemoglobin aan caadi ahayn iyo ahaanshaha side.

Qof kasta wuxuu noqon karaa side cudurka haemoglobin. Hase yeeshee, aad ayay ugu badan tahay dadka faracoodu ka soo jeedo Afrika, Kareebiyaanka, Meditereeniyaan, Hindiya, Bakistaan, Koonfurta iyo Koonfur-Bari Aasiya iyo Bariga Dhexe.

### Muxuu ka kooban yahay baaritaanka eegidda?

Baaritaanka waqtiga uurka ee sickle cell iyo thalassaemia wuxuu ka kooban yahay samaynta baaritaan dhiig. Waxaa ugu haboon in baaritaanka la sameeyo inta aan uurkaagu gaadhin ka hor 10 usbuuc . Dhammaan dumarka uurka leh waxaa la siiyaa baaritaan thalassaemia ah laakiin dhammaan dumarka oo idil si otomaatiik ah looma siiyo baaritaanka cudurka sickle cell. Baaritaanka la bixiyo waxay ku xiran tahay halka aad ku nooshahay.

Meelaha uu cudurka haemoglobin aad caadi uga yahay waxaa lagu siin doonaa baaritaan dhiig oo cudurka sickle cell. Meelaha uu cudurka haemoglobin ku yar yahay xog-waraysi ayaa la isticmaalaa si loo aqoonsado asalka hooyada iyo aabaha ilmaha. Haddii xog-waraysi muujinayo in mid ka mid ah waalidka uu khatar ugu sugan yahay sidida cudurka sickle cell, baaritaan eegid ayaa la siinayaa haweeneyda. Waxaad waydiisan kartaa inaad hesho baaritaanka xitaa haddii asalka qoyskaaga uusan muujinayn inuu ilmuhu khatar sare ugu jiri karo cudurka haemoglobin.



### **Miyuu baaritaanka eegiddani dhibaatayn karaa aniga ama ilmahayga?**

Baaritaanka eegidda ma dhibaataynayo adiga ama ilmaha laakiin waa muhiim in taxadar leh loo tixgeliyo haddii la samaynayo baaritaankan iyo haddii kaleba. Baaritaanka eegidda wuxuu bixinayaa macluumaad macnihiisu noqon karo inaad samayso go'aanno dheeraad ah oo muhiim ah. Tusaale ahaan, waxaa lagu siin karaa baaritaanno dheeraad ah oo leh khatar ilmo-dilan.

### **Aabahaasha – haddii hooyadu cudur-side tahay waa kuu muhiim in adiga**

#### **Miyaan u baahanahay samaynta baaritaankan?**

Qasab ma ahan inaad samayso baaritaankan eegidda. Qaar dadka ah waxay doonayaan inay ogaadaan haddii ilmahoodu qabo cudurka sickle cell ama thalassaemia halka qaarna aysan doonayn.

#### **Maxaa dhacaya haddii aanan samayn baaritaankan?**

Haddii aad doorato inaad samayn baaritaanka eegidda waqtiga uurka, ilmuha waxaa lagu samayn karaa baaritaan dhibco dhiig cusub ee cudurka sickle cell muddo shan maalmood ah ee marka uu dhasho.

#### **Maxsuullada macquulka ah**

Baaritaanku wuxuu kuu sheegayaa haddii aad cudur-side tahay iyo haddii kaleba, ama haddii aad adiga naftaadu cudurka qabto.

#### **Miyaan u baahanahay baaritaanno dheeraad ah?**

Haddii aad tahay cudur-side ee cudurka haemoglobin, aabaha ilmaha waxaa la siinayaa baaritaan dhiig. Haddii aabaha ilmaha uu sidoo kale yahay cudur-side waxaa la idin siinayaa baaritaan wax-la-sii ogaaday si loo ogaado haddii ay ilmaha saamaysay.

Haddii aabaha ilmaha aan la helayn ama adiga lagu aqoonsaday inaad cudur-side tahay waxaa lagu siin doonaa baaritaanka wax-la-sii ogaaday.

Qiyaastii 100kiiba 1(1%) ee baaritaanka wax-la-sii ogaaday wuxuu keena ilmo-dilan. Adiga ayay kuu taal haddii aad samaynayso iyo haddii kaleba baaritaan dheeraad ah.

Waxaa jira laba nooc oo baaritaan wax-la-sii ogaaday.

#### **CVS (chorionic villus sampling) waxaa caadiyaan la sameeyaa**

11 ilaa 14 usbuuc ee uurka. Cirbad fiican, oo caadiyan lagu mido caloosha hooyada, ayaa loo isticmaalaa qaaditaanka dheecaan baaritaan laga keenay placenta. Unugyada nuddo ayaa laga baaraa cudurrada sickle cell ama thalassaemia.

#### **Amniocentesis waxaa caadiyan la sameeyaa kaddib 15 usbuuc ee uurka.**

Cirbad fiican ayaa lagu mudaa caloosha hooyada iyadoo u gudbaysa minka- uterus si loo soo qaado waxoogaa dareere ah ee ku wareegsan ilmaha. Dareeraha waxaa ku jiraa qaar ka mid ah unugyada ilmaha, kaasoo laga baari karo cudurrada sickle cell ama thalassaemia.

Haddii maxsuulku muujiyo in ilmuhu qabo cudurka sickle cell ama thalassaemia markaa kaddib waxaa ballan lagaaga samaynayaa xirfadle caafimaad. Waxaad heli kartaa macluumaad ku saabsan xaaladda uu ilmuhu dhaxlay adigoo kala hadlaya sida kula fiican. Xaaladaha qaar way ka khatarsan yihiin kuwa kale.

Qaar dumarka ah waxay go'aansadaan inay sii wataan uurka; qaar kale waxay go'aansadaan inaysan sii wadanin uurka ayna dhammeeyaan.

Haddii ay kula soo gudboonaato xulashadan waxaad helaysaa caawinaad aad go'aan ku gaari karto.

Haddii baaritaanku muujiyo inaad cudur-side tahay, waxaa jira fursad ah in xubnaha kale ee qoyskaaguna ay cudur-sideyaal ahaan karaan sidoo kale. Waxaad ku dhiiro-gelin kartaa inay baaritaan sameeyaan, gaar ahaan haddii ay qorshaynayaan inay ilmo qaadaan.

### **Helitaanka maxsuulladayda**

Qofka samaynaya baaritaanka wuxuu kaala hadlayaa habaynta helitaanka maxsuulkaaga.

## Calaamadaha Down's, Edwards' iyo Patau's

[nhs.uk/downs](https://nhs.uk/downs)

### Maxaa loogu talagalay baaritaanka eegidda?

Si aad u ogaato sida ay macquul u tahay in ilmuhu qabo calaamadaha Down's (sidoo kale loo yaqaan Trisomy 21 ama T21), calaamadaha Edwards' (Trisomy 18 / T18) ama calaamadaha Patau's (Trisomy 13 / T13).

### Ku saabsan xaaladahan

Gudaha unugyada jirkeenna waxaa jira qaabab-dhisme yar-yar lagu magacaabo chromosomes. Chromosomes-yadan waxay sidaan hidde-sideyaasha sugaya qaabka aan u samaysmayno. Waxaa ku jira 23 laba-laba ah oo chromosomes unug kasta. Dhibaatooyin ayaa dhici kara markii biyo-shahwo- sperm ama unugyo ukun ay soo baxaan kuwaas oo keeni kara in ilmo yeesho chromosome dheeraad ah.

Ilmaha qaba calaamadaha Down's, Edwards' iyo Patau's waxaa dhala hooyooyin da' kasta leh laakiin helitaanka fursadaha ilmo qaba xaaladahan wuxuu la kordhayaa marka da'da hooyadu sii korodhaba.

### Calaamadaha Down's (T21)

Calaamadaha Down's waxaa jira koobi –nuqul dheeraad ah ee chromosome 21 ee unug kasta. Waxay saameysaa 1 ee 10,000 kasta ee dhalasho.

Ilmo ku dhasha calaamadaha Down's waxaa ku dhici kara kala-dhantaalnaan waxbarasho (learning disability). Tani macnaheedu waa inay ku adkaato marka loo eego dadka kale fahamka iyo barashada arrimo cusub. Waxay qabi karaan dhibaato is-gaarsiin hadal iyo ku adkaanta maaraynta hawlo maalmeedka. Waa macquul in la ogaado heerka kala-dhantaalnaanta waxbarasho ee ilmo qaba calaamadaha Down's uu qabi karo. Waxay u dhaxayn kartaa mid fudud ilaa mid aad u daran.

Inta badan carruurta qaba calaamadaha Down's waxay fariistaan dugsiga hoose/dhexe ee caadiga ah. Wax badan ayaa hadda laga yaqaan arrinta ku saabsan sida loo horumariyo awoodda carruurta qaba calaamadaha Down's. Dadka qaba calaamadaha Down's waxay yeelan karaa nolol tayo fiican leh. Iyadoo caawinaad ka helaya qoyskooda iyo dadka kaleba, dad badani shaqo ayay heli karaan iyadoo si madax-bannaan u nool.

Qaar dhibaatooyin caafimaad ah ayaa ku badan dadka qaba calaamadaha Down's, tusaale ahaan, xaalado wadnaha ah, iyo dhibaatooyin habdhiska dheefshiidka ah, maqalka iyo aragtida. Qaar dhibaatooyinka ah aad ayay u darnaan karaan laakiin qaar badan ayaa la daawayn karaa. Markii la helo daryeel-caafimaad wanaagsan, qof qaba calaamadaha Down's waxaa laga filayaa inuu noolaado qiyaastii 60 sano.

Dadka qaba calaamadaha Down's waxay qabaan indho qaab yicibta oo kale ah iyo qaabab weji la sooci karo laakiin dhammaantood isuma eka. Sida dhammaan carruurta kaleba, waxay sidoo kale ka dhaxlaan qaabab waalidkooda.



## **Calaamadaha Edwards' (T18) iyo Patau's (T13)**

Calaamadaha T18 waxaa jira nuqul dheeraad ah ee chromosome 18 halkii unugba. Calaamadaha T18 waxaa jira nuqul dheeraad ah ee chromosome 18 halkii unugba.

Nasiib-darro, inta badan ilmaha qaba calaamadaha Edwards' ama Patau's waxay dhintaan ka hor dhalashada, ama iyagoo dhintay ha dhashaan ama ha dhintaan waxyar kaddib dhalashada. Qaar ilamaha ka mid ah waxay badbaadayaan ilaa ay ka waynaadaan laakiin tani waa wax aad u yar.

Dhammaan carruurta ku dhasha calaamadaha Edwards' iyo Patau's waxay qabayaan dhibaatooyin aad u kala duwan, kuwaasoo caadiyaan aad u daran – kuwan waxaa ku jira dhibaatooyin maskaxeed aan caadi ahayn.

**Ilmaha ay saameeyaan calaamadaha T18** waxay qabi karaan dhibaatooyin wadnaha ah, qaabab madax iyo weji aan caadi ahayn, dhibaatooyin koritaan iyagoo aan istaagi ama socon karin. Calaamadaha T18 wuxuu saameeyaa 3 ee 10,000 kasta ee dhalasho.

**Ilmaha ay saameeyaan calaamadaha T13** waxay qabi karaan dhibaatooyin wadnaha ah, bishin faruuran iyo palate, dhibaatooyin koritaan, si liidata u samaysan indhaha iyo dhegaha ah, dhibaatooyin dhinaca kelyahooda ah iyagoo aan istaagi ama socon karin. Calaamadaha T18 wuxuu saameeyaa 3 ee 10,000 kasta ee dhalasho.

### **Muxuu ka kooban yahay baaritaanku?**

Baaritaan eegid ee xaaladahan waxaa la helayaa inta u dhaxaysa 10 iyo 14 usbuuc ee uurka.

Haddii aad doorato samaynta baaritaanka isku-dhufan, dhiig baaritaan ayaa lagaa qaadayaa. Masawair falaaraha dhawaqa (ultrasound scan) ah ay dareeraha qoorta qaybta dambe ee ilmaha lagu cabbirayaa (taasoo loo yaqaan nuchal translucency). Macluumaadka labadan baaritaan ayaa loo isticmaalayaa xisaabinta khatarta in ilmuhu qaado calaamadaha T21 iyo T18 / T13.

**Waa go'aan adiga kuu yaal haddii aad samaynayo iyo haddi kaleba baaritaan**

Haddii uurkaagu aad uga fog yahay samaynta baaritaanka is-wata ee calaamadaha T21, waxaa lagu siin doonaa baaritaan dhiig inta u dhaxaysa 14 iyo 20 usbuuc ee uurka. Baaritaankani uma saxna sida baaritaanka isku-dhufan. Haddii uurkaagu aad uga fog yahay samaynta baaritaanka is-wata ee calaamadaha T18 / T13, waxaa lagu siin doonaa masawir waqtiga uurka dhexdiisa ah kaasoo eegaya wixii qaab jismi aan caadi ahayn ah.

### **Miyuu baaritaanka eegiddani dhibaatayn karaa aniga ama ilmahayga?**

Baaritaanka eegidda ma dhibaataynayo adiga ama ilmaha laakiin waa muhiim in taxadar leh loo tixgeliyo haddii la samaynayo baaritaankan iyo haddii kaleba.

Baaritaankani si kama dambays ah kuuma sheegayo haddii ilmuhu qabo calaamadaha Down's ama Edwards' iyo Patau's ama haddii kaleba. Baaritaanka eegiddu wuxuu bixin karaa macluumaad keeni kara go'aanno dheeraad ah oo muhiim ah. Tusaale ahaan, waxaa lagu siin karaa baaritaan wax-la-sii ogaaday kuwaasoo wata khatar ah ilmo-dilan.

### **Miyaan u baahanahay samaynta baaritaankan?**

Qasab ma ahan inaad samayso baaritaanka eegidda. Qaar dadka ah waxay doonayaan inay ogaadaan haddii ilmahoodu qabo calaamadaha Down's ama Edwards' iyo Patau's qaarna ma doonayaan.

Waxaad dooran kartaa samaynta baaritaanka aad u rabto:

- Calaamadaha Down's, Edwards' iyo Patau's
- Calaamadaha Down's (T21)
- Calaamadaha Down's, Edwards' iyo Patau's
- midna xaaladaha

### **Maxaa dhacaya haddii aanan samayn baaritaankan?**

Haddii aad doorato inaad samayn baaritaanka eegidda ee calaamadaha Down's, Edwards' iyo Patau's waxaad weli dooran kartaa samaynta baaritaannada kale.

Haddii aad doorato inaad samayn baaritaannada eegidda ee xaaladahan waa muhiim in la fahmo in haddii aad samayso masawir waqti kastaba ee waqtiga guurka ay soo qaban karto wixii qaab jismi aan caadi ahayn ah. Kuwaan waxaa lala xiriirin karaa calaamadaha T21 ama T18 / T13 laakiin waxaa jira fursad dhibaatooyinka kale lagu ogaan karo masawir ahaan. Qofka ku masawiraya ayaa mar kasta kuu sheegaya haddii wax aan caadi ahayn la helay.

### **Maxsuullada macquulka ah**

Waxaa lagu siin doonaa laba khataro maxsuulkood: mid ah calaamadaha T21 iyo mid kale oo ah calaamadaha T18 / T13.

Haddii baaritaanka eegidda uu tusiyo in fursadda uu ilmuhu ku qaadi karo calaamadaha Down's ama Edwards' iyo Patau's ay ka hoosayso 150 kiiba1 tan waxaa lagu magacaabaa maxsuul 'khatar-hoose'. In ka badan 95 100 kiiba (95%) ee maxsuullada baaritaanka eegidda wuxuu noqdaa khatarta hoose.

Maxsuul khatar-hoose macnaheedu ma ahan inaysan khatar jirin gebi ahaanba in ilmuhu qaado calaamadaha T21 ama T18 / T13. Haddii baaritaanka eegidda uu tusiyo in fursadda uu ilmuhu ku qaadi karo calaamadaha Down's ama Edwards' iyo Patau's ay ka sarayso 1 150 kiiba, taasi waa laga bilaabo 1 ee 2diiba ilaa 1 150 kiiba, tani waxaa lagu magacaabaa maxsuulka 'khatar sare'.

Maxsuul khatar sare macnaheedu ma ahan in ilmuhu kama dambaystii uu qabo T21 ama T18 / T13.

## Miyaan u baahan doonaa baaritaan dheeraad ah?

Haddii haysato maxsuul khatar hoose laguma siin doon baaritaan dheeraad ah.

Haddii aad haysato maxsuul khatar sare waxaa lagu siin doonaa baaritaan wax-la-sii ogaaday si loo ogaado haddii ilmuhu qabo calaamadaha Down's ama Edwards' iyo Patau's ama haddii kaleba.

Baaritaannada wax-la-sii ogaaday ee calaamadaha Down's waxay sidoo kale eegayaan chromosomes 18 iyo 13 markaa waxay sidoo kale kuu sheegayaan haddii ilmuhu qabo calaamadaha Edwards' iyo Patau's ama haddii kaleba. Si la mid ah, baaritaannada wax-la-sii ogaaday ee calaamadaha Edwards' iyo Patau's waxay sidoo kale eegayaan chromosome 21 ee calaamadaha Down's.

Qiyaastii 1 100 kiiba (1%) ee baaritaannada wax-la-sii ogaaday waxay keenaan ilmo-dilan. Adiga ayay kuu taal haddii aad samaynayso iyo haddii kaleba baaritaan dheeraad ah.

**Baaritaanku ma bixinayo jawaabta kama dambaysta ah. Taasi waa sababta lagu siiyay baaritaan wax-la-sii ogaaday**

Waxaa jira laba nooc oo baaritaan wax-la-sii ogaaday.

**CVS (chorionic villus sampling)** waxaa caadiyaan la sameeyaa 11 ilaa 14 usbuuc ee uurka. Cirbad fiican, oo caadiyan lagu mido caloosha hooyada, ayaa loo isticmaalaa qaaditaanka dheecaan baaritaan laga keenay placenta. Unugyada dheecaanka ayaa kaddib laga baaraa calaamadaha Down's, Edwards' and Patau's.

**Amniocentesis** waxaa caadiyan la sameeyaa kaddib 15 usbuuc ee uurka. Cirbad fiican ayaa lagu mudaa caloosha hooyada iyadoo u gudbaysa minka- uterus si loo soo qaado waxoogaa dareere ah ee ku wareegsan ilmaha. Dheecaan waxaa ku jira unugyada ilmaha, kuwaasoo laga baaro calaamadaha Down's, Edwards' and Patau's.

Tiro yar oo dumar ah kuwaasoo sameeyaa baaritaanka wax-la-sii ogaaday waxay ogaadaan in ilmahoodu qabo calaamadaha Down's ama Edwards' iyo Patau's. Markaa kaddib waxay haystaan laba xulasho. Qaar dumarka ah waxay go'aansadaan sii waditaanka uurkooda waxayna u diyaariyaan ilmahooda xaaladda; qaar kale waxay go'aansadaan inaysan sii wadin uurka oo ay joojiyaan.

Haddii ay ku soo wajahdo xulashadan waxaad helaysaa caawinaad aad ku samayso go'aan.

## Helitaanka maxsuulladayda

Haddii baaritaankaaga eegidda uu tusiyo maxsuul khatar hoose, waxaa lagu sheegayaa laba usbuuc gudahood ee markii baaritaanka la sameeyay.

Haddii baaritaankaaga eegidda tusiyo maxsuul khatar sare, waxaa laguugu sheegayaa saddex maalmood oo shaqo gudahood ee maxsuulka baaritaanka

dhiiggu diyaar ku yahay. Waxaa lagu siin doonaa ballan si looga wada-hadlo maxsuullada baaritaanka iyo xulashooyinka kale ee aad haysato.



## Qaab jismi an caadi ahayn (masawirka waqtigaha bartamaha uurka)

[nhs.uk/anomalyscan](https://www.nhs.uk/anomalyscan)

### Maxaa loogu talagalay masawirka?

Si loo eego qaab jidheed aan caadi ahayn ee ilmaha. Masawirku wuxuu kaliya eegayaa qaar dhibaatooyinka ilmaha ah mana heli karo wax kasta oo qaldami kara.

### Ku saabsan xaaladaha uu masawirku eegayo

Masawirku wuxuu si faahfaahsan u eegayaa lafaha ilmaha, wadnaha, maskaxda, xangulaha laf-dhabarta, wajiga, kalyaha iyo caloosha.

Kiisaska inta badan masawirku wuxuu tusinayaa in limuhu u muuqado inuu u socdo sidii loogu talagalay laakiin mararka qaar dhibaato ayaa la helaa ama laga shakiyaa. Qaar dhibaatooyinka ah waxay aad uga muuqanayaan kuwa kale.

Tusaale ahaan, qaar ilmaha ah waxay qabaan dhibaato loogu yeero spina bifida, taasoo saamaysa xangulaha laf-dhabarta. Spina bifida waxaa si caadi ah loogu arki arkaa masawir iyadoo ilmaha qaba dhibaatan, qiyaastii 9 ee 10kiiba (90%) la ogaado.

Qaar kale, sida cillado wadnaha ah, aad ayay u adag tahay in la arko. Masawirku wuxuu ogaadaa qiyaastii kala bar (50%) ee ilmaha qaba cillado wadnaha ah.

**Masawirku wuxuu eegayaa qaar qaab jismi aan caadi ahayn laakiin ma heli karo wax kasta oo qalad ah**

Qaar dhibaatooyinka lagu arki karo masawirka macnaheedu waa in ilmuhu u baahan yahay daawayn ama qaliin kaddib dhalashada, tusaale ahaan bishin faruuran . Qaar tiro kiisas yar ah ayaa la helaa qaar dhibaatooyin aad khatar u ah, tusaale ahaan, maskaxda ilmaha, kelyaha, xubnaha uur-ku-jirta ama lafaha ee aan si fiican u samaysmin. Qaar tiro kiisas yar ah ayaa la helaa qaar dhibaatooyin aad khatar u ah, tusaale ahaan, maskaxda ilmaha, kelyaha, xubnaha uur-ku-jirta ama lafaha ee aan si fiican u samaysmin. Qaar aad u daran, ee kiisas yar kuwaasoo daawayn aysan macquul ahayn, ilmuhu dhaqso ayuu u dhintaa markiiba kaddib marka uu dhasho ama dhintaa waqtiga uurka.

Wixii macluumaad faahfaahsan ah ee ku saabsan xaaladaha muhiimka ah ee lagu eego masawir waqtiga kala barka uurka fadlan eeg [www.nhs.uk/anomalyscan](https://www.nhs.uk/anomalyscan).



### **Muxuu ka kooban yahay baaritaanka eegidda?**

Masawirka xaaladahan wuxuu caadiyan dhacaa inta u dhaxaysa 18 iyo 20 usbuuc iyo 6 maalmood ee uurka. Inta badan masawirada waxaa sameeya shaqaale si gaar ah loo tababaray looguna yeero sonographers. Si uu sonographer-ku u helo masawiro fiican ee ilmaha, masawirka waxaa lagu qaadaa meel qol iftiin daciif ah leh.

Waxaa lagu waydiin doonaa inaa ku seexato gogol. Waxaa kaddib lagu waydiin doonaa inaad kor u qaado qaaybta hore ee xabadkaaga aadna hoos u dhigto goonadaada ama sarwaalkaaga ilaa lugaha.

Warqad ayaa lagu wareejinayaa dharkaaga si looga dhawro dheecaanka kareemka ultrasound, kaasoo kaddibna lagaa marinayo caloosha. Sonographer-ku wuxuu marinayaa aalad gacanta lagu hayo jirkaaga si uu u baaro jirka ilmaha. Kareemku wuxuu xaqiijinayaa inuu jiro xiriir fiican oo u dhexeeya aaladda iyo jirkaaga.

### **Waxaa lagu siin doonaa baaritaanno dheeraad ah haddii dhibaato laga shakivo**

In la sameeyo masawirka dhibaato ma keenayso laakiin sonographer-ku wuxuu ku isticmaali karaa cadaadis yar si loo helo aragtida ugu fiican ee ilmaha. Tani waa mid laga yaabo in diiqad la dareemo. Masawir madow iyo caddaan ah ee ilmaha ayaa kaddib lagu arkayaa shaashadda ultrasound. Waqtiga baaritaanka, sonographers-ku waxay u baahan yihiin inay shaashadda ku hayaan boos siinaya ayaga aragti fiican ee ilmaha. Shaashaddu ayaga ayay toos ugu aadanaan kartaa ama waxooga ka leexsanaan kartaa.

Ballantu waxay caadiyan qaadataa qiyaastii 30 daqiiqo. Mararka qaar way adag tahay in la helo masawir fiican haddii ilmahu u jiifo qaab gurac ah uu dhaqaaqayaa badan samaynayo ama haddii aad ka buuran tahay sida miisaanka caadiga ah; tani macnaheedu ma ahan inaan wax ka walwasho. Waa in kaadihaysta buuxdaa markii aad ballanta u imaanayso. Dhakhtarka ama umulisada ku daryeelaya ayaa kuu sheegaya ka hor inta aadan imaan. Haddii aadan hubin, waad la xiriiri kartaa oo waydiin kartaa.

Masawirka waqtiga kala barka uurka wuxuu mararka qaar ka heli karaa dhibaatooyin ilmaha. Waxaad u baahan kartaa qof kuu soo raaca ballanta masawirka. Inta badan cisbitaallada ma u oggolaadaan carruura inay joogaan waqtiga masawirka maadaama daryeel-carruur aan laga helayn halkaas. Fadlan waydii cisbitaalkaaga arrintan ka hor ballantaada.

### **Miyuu masawirkan dhibaatayn karaa aniga ama ilmahayga?**

Ma jiraan wax khataro la og yahay oo ilmaha ama hooyada ka soo gaaraya masawirka ultrasound laakiin waa muhiim inaad si taxadar leh u tixgeliso inaad masawirka samaynayso iyo in kale. Masawirku wuxuu bixin karaa macluumaad macnahoodu noqon karo inaad samayso go'aanno dheeraad ah oo muhiim ah.

Tusaale ahaan, waxaa lagu siin karaa baaritaanno dheeraad ah oo leh khatar ilmoodilan.

### **Miyaan u baahanahay masawirkan?**

Qasab ma ahan inaad samayso masawirkan. Qaar dadka ah waxay doonayaan inay ogaadaan haddii ilmahoodu dhibaado qabo qaar kale ma doonayaan.

### **Maxaa dhacaya haddii aan go'aansado inaanan samayn masawirkan?**

Haddii aad doorato inaad samayn masawirkan daryeelkaaga xiliga uurka iyo umusha sidii caadiga ahayd ayuu u soconayaa.

### **Maxsuullada macquulka ah**

Masawirrada inta badan waxay tusiyaan in ilmuhu u muuqdo inuu caadi u samaysmayo sida la filayo, iyadoo markaa aan wax dhib ah la helin.

Haddii wax dhibaato ah la helo ama laga shakiyo, sonographer-ka wuxuu waydiin karaa fikrad labaad xubin kale oo shaqaalaha ka mid ah.

Masawirradu ma heli karaan dhammaan wixii dhibaatooyin ah. Waxaa mar kasta jira fursad ah in ilmo ku dhasho dhibaato caafimaad oo aysan masawirradu aqoonsan karin.

### **Miyaan u baahan doonaa baaritaan dheeraad ah?**

Waxaa lagu siin karaa baaritaan kale si loo ogaado xaqiiqda haddii ay dhibaato jirto.

Haddii lagu siiyo baaritaanno dheeraad ah waxaa lagu siin doonaa macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan ayaga si aad u go'aansato haddii aad doonayso inaad samayso iyo haddii kaleba. Waxaad kala hadli kartaa tan umulisadaada ama la taliye/dhakhtar. Haddii ay muhiim tahay, waxaa laguu gudbin doonaa dhakhtar takhasus, waxaana macquul ah cisbitaal kale.

### **Helitaanka maxsuulladayda**

Sonographer-ku wuxuu kuu sheegi karaa maxsuullada masawirka waqtigaas.

## Dhibaatooyinka indhaha ee dumarka macaanka qaba

[nhs.uk/diabeticeye](https://nhs.uk/diabeticeye)

### Maxaa loogu talagalay baaritaanka?

Si loo eego calaamado macaanka ee cudur-indhood macaanka la socda (diabetic retinopathy) iyo dhibaatooyinka indhaha ee kale ay sababto macaanku iyagoo kormeeraya caafimaadka indhahaaga haddii aad uur leedahay aadna qabto macaanka nooca 1 ama nooca 2. Uma baahnid baaritaan macaanka indhaha ah haddii aadan qabin macaan ka hor uurka.

Qaar dumarka ah waxaa ku dhaca macaanka uurka waqtiga dambe ee uurka (28 usbuuc ama ka badan). Macaanka uurka waxaa lagu daawayn karaa baddalidda cuntada iyadoo caadiyan iska baxda kaddib dhalashada ilmaha. Uma baahnid baaritaan macaanka indhaha ah haddii aadan qabin macaan ka hor uurka.

**Baaritaanka waxaa kaliya la bixinayaa haddii aad horeba u qabtay macaan ka hor intaadan uur yeelan**

### Ku saabsan xaaladdan

Cudur-indhood macaanka la socda waxaa sababa markii macaanku saameeyo xiddidada yaryar ee dhiigga ee gudaha retina ee gadaasha dambe ee isha.

Qof kasta oo qaba macaan waxaa la siiyaa baaritaan indhaha ah laakiin baaritaanku aad ayuu muhiim u yahay markii aad uur leedahay sababtoo ah khatarta dhibaato indhaha ah aad ayay u wayn tahay.

### Muxuu ka kooban yahay baaritaanka eegidda?

Waxaa lagu siin doonaa baaritaan goorta, ama markiiba kaddib, booqashadaada ugu horaysa ee rugta caafimaadka ilmaha iyo weliba sidoo kale kaddib 28 usbuuc ee uurka. Haddii la helo heerarka hore cudur-indhood macaanka la socda marka la sameeyo baaritaanka koowaad, waxaa lagu siin doonaa baaritaan kale inta u dhaxaysa 16 iyo 20 usbuuc ee uurka. Haddii la helo xaalad aad u daran ee cudur-indhood macaanka la socda waqtiga baaritaanka, waxaa lagu gudbin doonaa dhakhtar takhasus ee indhaha.

Baaritaanka Retinal ee uurka wuxuu la mid yahay sida baaritaanka caadiga ah ee indhaha markii aad macaan qabto. Shaqaalaha baaritaanku waxay diiwaan gelinayaan faahfaahintaada iyo heerka aragtidaada. Waxay ku shubi doonaan daawo indhahaaga si loo wayneeyo kulucda isha si si fiican loogu arki karo retinas lagana qaado masawiro digital ah ee retinas-daada.

Haddii masawirradu aysan si fiican u muuqanin waxaa lagu gudbin doonaa dhakhtar takhasus ah ee baaritaan ka duwan.

### Miyuu baaritaanka eegiddani dhibaatayn karaa aniga ama ilmahayga?

Masawirku waa midaan xanuun lahayn iyadoo kaameradu aysan u dhawaanayn isha. Dhibcaha daawada waxay dhawr il-biriqsi ku jiri karaan isha oo keeni karaan aragti wareersan muddo 2-6 saacadood ah kaddib baaritaanka. Soo qaado

dhammaan ookiyaalayaashaada sida caadiga ah. Soo qaado ookiyaalaha qorraxda si aad guriga ugu sii xiratid, maadaama wax kasta ay iftiin u muuqan karaan kaddib baaritaanka eegidda.

Habayso isticmaalidda gaadiidka dadwaynaha ama qof ku sii geeya guriga **Baabuur ma wadi kartid kaddib baaritaanka maadaama dhibcaha daawada isha ay aragtida wareerin karaan.**

Si aad u yar, dhibacaha daawada waxay keeni karaan cadaadiska oo si dhaqso ah, saa'idna ah u kaca isha gudaheeda. Calaamadaha cadaadiska sare u kaca waxaa ka mid ah:

- xanuun ama nefis la'aan daran ee isha
- guduud qaybta caddaanka ee isha
- aragti cawiran joogto ah.



Haddii aad dareento mid ka mid ah calaamadahan kaddib baaritaanka, waa inaad ku laabataa qaybta indhaha ama aadaa waaxda Shilalka iyo Xaaladaha Degdega ah.

### **Miyaan u baahanahay baaritaankan?**

Baaritaankan si aad ah ayaa loogu talinayaa gaar ahaan haddii aad horeba u qabtay macaan ka hor uurka.

Baaritaanka ishu waa qayb ka mid ah maaraynta macaankaaga iyadoo macaanka retinopathy la daawayn karo, gaar ahaan markii horeba loo ogaado.

### **Maxaa dhacaya haddii aanan samayn baaritaankan?**

Dadka qaba macaanka waxay go'aansan karaan inaysan tagin ballamaha baaritaanka.

Haddii aad go'aansato inaad qaad baaritaanka waa inaad u sheegtaa dhakhtarka ka warqabaya daryeelka macaankaaga waqtiga uurka.

### **Maxsuullada macquulka ah**

Haddii aad samayso baaritaanka eegidda, maxsuullada macquulka ah waa:

- ma jirto cudur-indhood macaanka la socda
- calaamdo hore oo cudur-indhood macaanka la socda
- cudur-indhood macaanka la socda oo aad u daran taasoo u baahanah u gudbin dhakhtar takhasus.

Haddii baaritaankaagu tusayo calaamado hore oo cudur-indhood macaanka la socda, xirfadlahaaga caafimaad wuxuu ku siinayaa talo ku saabsan daryeelka macaankaaga waqtiga uurka iyadoo lagugu casuumi doono baaritaan eegido dheeraad ah waqtiga uurkaaga. Haddii aad tahay sigaar-cabbe, raadso caawin joojin ama ugu yaraan yaree.

Haddii baaritaanku tusayo inaad qabto retinopathy la gudbin karo waxaad heli doontaa ballan ka socota dhakhtar takhasus indhaha.

**Helitaanka maxsuulladayda**

Warqad ayaa lagu soo dirayaa adiga iyo dhakhtarkaaga (GP) 6 usbuuc gudahood kaddib ballanta baaritaankaaga.

## Wadnaha, indhaha, miskaha iyo xiniinyaha (baaritaan qaab jidheed)

[nhs.uk/newborninfantexam](https://www.nhs.uk/newborninfantexam)

### Maxaa loogu talagalay baaritaanka eegidda?

72 saacadood gudahood ee dhalmada, waxaa lagu siin doonaa baaritaan dhammaan jismiga ee ilmahaaga. Tan waxaa ku jiraya afar baaritaanno eegid gaar ah si loo ogaado haddii ilmahaagu uu qabo dhibaatooyin ah dhinaca indhahooda, wadnaha, miskaha ama, wiilasha, xiniinyahooda taasoo faa'iidaynaysa baaritaan waqti horeba ah iyo daawayn macquul ah.

Baaritaannada eegidda waxaa la samaynayaa mar kale inta u dhaxaysa 6-8 usbuuc da'da ah maadaama xaaladaha qaar aysan samaysmin ama muuqanin markaas ka hor.

**Baaritaanku waa qayb ka mid ah kor-ka-eegid -top-to-toe baaritaan jidhka gebi ahaantiis ah oo ilmahaaga**

### Ku saabsan xaaladaha

Qayb kasta oo ka mid ah baaritaannada jidheedsmi waxaa la eegayaa xaalado kala duwan.

**Indhaha** – Baaritaanku wuxuu eegayaa muuqaalka iyo dhaqdhaqaaqa indhaha wuxuuna baarayaa haddii ilmahaagu qabo xuub isha -cataracts iyo dhibaatooyin kale. Qiyaastii 2 ama 3 ee 10,000kii ilmo ahba waxay ku dhashaan xuub indho -cataracts. Baaritaanku ma sheegi karo sida uu ilmahaagu si fiican wax ugu arki karo.

**Wadnaha** – Waxaa jira baaritaan guud ee ilmahaaga wadnihiisa iyadoo mararka qaarkood la helo murmurs. Murmur waa dhawaaq uu sameeyo dhiigu marka uu marayo wadnaha. Inta badan kiisaska markii murmur la maqlo, wadnuhu waa caadi. Murmurs waa u caadi ilmaha iyadoo tani macnaheedu aysan mar kasta ahayn dhibaato. Hase yeeshee, qiyaastii 1kii ee 200 kasta ilmuhu waxay qabaan dhibaato wadne kaasoo u baahan daawayn.

**Miskaha** – carruurto waxay ku dhalan karaan miskaha isku-xir aan si fiican u samaysmin iyadoo haddii aan la daawayn ay tani keeni karto dhutin iyo dhibaatooyin isku-xir. Qiyaastii 1 ama 2 ee 1,000kii ilmo ah waxay qabaan dhibaato laf-dhabar taasoo u baahan daawayn.

**Xiniinyaha** – ilmaha wiilasha ah waa la eegaa si loo xaqiijiyo in xiniinyahoodu uu meeshii saxda ahayd ku yaal, tusaale ahaan, in hoos u dagsan yihiin. Waxay qaadan kartaa dhawr bilood in xiniinyaha hoos ugu dagto qaybta jirta ee waafaqsan - scrotum.

### Muxuu ka kooban yahay baaritaanku?

Xirfadlaha caafimaad ayaa samaynaya baaritaan jidheed oo ilmahaaga oo waydiinayana ilmahaaga waa in dharka laga siibaa si loo baaro.





Waqtiga baaritaanka, xirfadlaha caafimaad wuxuu:

- eegaya indhaha ilmahaaga isagoo diiradda saaraya sida ay indhuhu u eg-yihiin iyo dhaqaaqooda
- dhagaysanayaa wadnhooda isagoo isticmaalaya qalabka stethoscope si loo aqoonsado dhawaqa wadnaha
- baarayaa miskahooda si loo xaqiijiyo isku-xirku inay boos ku haboon yaalaan
- baarayaa ilmaha wiilasha ah si loo eego in xiniinyahoodu meeshii ku haboonayd yaalaan.

Baaritaannadan eegidaha waxaa lagu samaynayaa 72 saacadood gudahood ee dhalashada iyo mar kale markii ilmahaagu gaaro da'da u dhaxaysa 6 ilaa 8 usbuuc.

**Baaritaanka waxaa la bixiyaa 72 saacadood gudahood ee dhalashada iyo mar kale inta u dhaxaysa 6-8 usbuuc**

### **Miyuu baaritaanku dhibaataynayaa ilmahayga?**

Ma jiraan khataro la socda samaynta baaritaannadan.

### **Miyuu ilmahaygu u baahan yahay samaynta baaritaankan?**

Baaritaanka waxaa loogu talagalay aqoonsiga wixii dhibaatooyin ah goor hore si daawayn loo bilaabi karo sida ugu dhaqso badan.

Baaritaanka guud ee qaab jismi ay ku jirto baaritaankan waa sidaas darteed mid lagula talinayo ilmahaaga.

### **Waa sidee haddii aan go'aansado in ilmahaygu uusan samayn baaritaankan?**

Waxaad go'aansan kartaa in ilmahaaga la baaro oo laga eego wixii xaalad ama dhammaan xaalado ah. Haddii aad qabto wax walaac ah waxaad kala hadli kartaa umulisadaada iyo xirfadlaha caafimaad ee samaynta baaritaanka.

### **Maxsuullada macquulka ah**

Caadiyan wax walaac keena lama helo. Haddii xirfadlaha caafimaad helo dhibaato macquul ah, ilmahaaga waxaa loo gudbinayaa qiimayn dheeraad ah iyo baaritaanno ku haboon.

**Ogaanshaha goor hore ee dhibaataada macnaheedu waa daawayn dhaqso ah**

### **Helitaanka maxsuulladayda**

Xirfadlaha caafimaad ee samaynta baaritaanka wuxuu ku siinayaa markiiba maxsuullada. Haddii gudbin qiimayn dheeraad ah loo baahdo, tani waxaa sidoo kale lagala hadlayaa adiga waqtiga baaritaanka.

Maxsuullada waxaa lagu diiwaan gelinayaa qoraallada kiisaska ilmahaaga iyo diiwaanka caafimaadka ilmaha qof ahaaneed (personal child health record ('buugga cas - red book')). Waa inaad ku xafidaa meel ammaan ah diiwaankaan aadna xaqiijisaa in la helayo mar kasta oo ilmahaaga uu la kulmayo xirfadle caafimaad.



## Lumitaan maqal

[nhs.uk/newbornhearing](https://nhs.uk/newbornhearing)

### Maxaa loogu talagalay baaritaanka eegidda?

Si loo ogaado ilmaha qaba lumitaan maqal si caawinaad iyo talo loo siiyo bilowga horeba.

**Inta badan ilmaha qaba maqal lumitaan waxay ka dhashaan qoysas aan lahayn taariikh hore oo maqal lumid**

### Ku saabsan xaaladdan

1 ilaa 2 ilmo ee 1,000 kasta ayaa ku dhalata maqal lumid joogto ah ee hal ama labada dhegoodba. Inta badan ilmahani waxay ka dhashaan qoysas aan lahayn wax taariikh dhagaalnimo ah.

Lumid maqal joogto waxay si aad ah u saamayn kartaa horumarka ilmaha. Hore u ogaanshuhu wuxuu siin karaa ilmahan fursad fiican ee lagu horumarinayo xirfadihiisa hadal iyo luuqadeed. Waxay ka caawinaysaa ilmaha xiriirka kala dhexeeya qoyskooda iyo daryeelayaashooda da'da bilowga ahba.

### Muxuu ka kooban yahay baaritaanku?

Cisbitaalo badan ayaa lagaa siinayaa baaritaanka eegidda maqalka ee ilmahaaga ka hor inta aan laga saarin ama lagu casuumayaa imaanshaha ballan caafimaad; meelaha qaarkood waxaa samaynaya booqdaha caafimaad usbuucyada ugu horeeyaba. Baaritaanka waxaa la samayn karaa ilaa da'da 3 bilood jir.



Baaritaanka lagu magacaabo AOAE (automated otoacoustic emission) wuxuu socdaa daqiiqado yar. Wax yar oo jilicsan oo dhag-la-galiyo ayaa la galiyaa qaybta bannaanka ee dhegta ilmaha iyadoo dhawaaq khafiif ah ee garaac ah la samaynayo. Markii dhegtu hesho dhawaaqa, qaybta hoose (lagu magacaabo cochlea) ayaa jawaabta iyadoo tan lag arki karo qalabka baaritaanka.

Ma ahan mar kasta macquul in laga helo jawaabo si fiican loo maqlo waqtiga baaritaanka. Tani macnaheedu ma ahan in ilmahaagu qabo lumitaan maqal. Waxaa macnaheedu noqon karaa:

- in ilmahaagu aanu deganayn markii la baaritaanka la samaynayay
- inuu jiray dhawaaq gadaal ka yeerayay
- in ilmahaagu ka qabay dareere ama xiritaan ku-meel-gaar ah dhegtooda.
- ilmahaagu wuxuu qabaa lumitaan maqal

Xaaladahan ilmahaaga waxaa la siinayaa baaritaan kale. Tani waxay la mid ahaan kartaa isla baaritaankii koowaad, ama nooc kale oo lagu magacaabo baaritaanka AABR (ka jawaabidda qayb-maskaxeedka maqalka otomaatiik ahaan - automated auditory brainstem response).

Tani waxay ka kooban tahay saddex dareemayaal yaryar oo lagu xirayo ilmaha madaxiisa iyo qoortiisa. Wax-lagu-dhagaystayaal (headphones) khafiif ah ayaa dhegta loo saarayaa ilmaha iyadoo dhawaaq khafiif ahna la yeerinayo. Baaritaankani wuxuu qaadanayaa inta u dhaxaysa shan iyo shan iyo toban daqiiqo.

### **Baaritaanka maqalku waa mid toos ah iyadoo inta badan ilmuhu ku seexdaan**

#### **Miyuu baaritaankani dhibaataynayaa ilmaha?**

Ma jiraan khataro la socda samaynta baaritaankaan.

#### **Miyuu ilmahaagu u baahan yahay samaynta baaritaanka?**

Baaritaanka eegidda waxaa lagula talinayaa ilmahaaga. In la ogaado lumitaan maqal goor horeba aad ayay muhiim ugu tahay horumarka ilmahaaga.

#### **Maxaa dhacaya haddii aan go'aansado inaan ilmahaagu samaynin baaritaanka?**

Haddii aad go'aansato inaan la siin ilmaha-dhashay baaritaanka eegidda waxaa lagu siin doonaa liis-eegitaan oo kaa caawinaya eegitaanka maqalka ilmahaaga markii ay sii koraanba iyadoo haddii aad wax walaac ah qabto aad kala hadli karto booqdahaaga caafimaad ama GP.

#### **Maxsuullada macquulka ah**

Haddii ilmahaagu leeyahay jawaab cad ee labada dhegoodba markaa way yar tahay inuu qaado lumitaan maqal. Hase yeeshee, baaritaanka maqalka ilmaha-dhashay ma soo qabanayo dhammaan noocyada lumitaanka maqal iyadoo carruurto ay yeelan karaan lumitaan maqal markii ay waynaadaan. Waa muhiim in la eego lumitaanka maqal ee ilmahaaga marka ay sii koraanba. Liiska-eegitaanka ee diiwaanka caafimaadka ilmahaaga qof ahaaneed (personal child health record ('buugga cas - red book')) wuxuu kuu sheegayaa sida tan loo sameeyo. Haddii aad wax walaac ah ka qabto maqalka ilmahaaga u sheeg booqdahaaga caafimaad ama dhakhtarka qoyska.

Haddii maxsuullada baaritaanka eegidda aysan tusaynin jawaab sax ah ee mid ama labada dhegood ee ilmaha ballan ayaa laga samaynayaa qaybta maqalka -audiology si loola kulmo dhakhtar ku takhasusay maqalka. Qiyaastii 2-3 ilmaha ee 100kiiba ma muujiyaan jawaab sax ah ee baaritaankooda eegidaha. U diridda baaritaan dheeraad ah ma ahan macnaheedu in ilmahaagu qabo lumitaan maqal.

Dhakhtar takhasus maqal waa inuu kula kulmaa afar usbuuc gudahood oo ka bilaabata ee marka aad samayso baaritaanka maqalka ilmahaaga. Aad ayay muhiim u tahay inaad tagto ballanta haddii ilmahaagu uu qabo lumitaan maqal.

#### **Helitaanka maxsuulladayda**

Waxaa lagu siin doonaa maxsuullada ilmahaaga markiiba marka la sameeyo baaritaanka maqalka.

## Dhibic dhiig

[nhs.uk/bloodspot](https://www.nhs.uk/bloodspot)

### Maxaa loogu talagalay baaritaanka?

Si loo ogaado haddii ilmahaagu qabo mid ka mid ah sagaalka xaaladood ee aadka u yar laakiin ah xaalado caafimaad aad u daran. Daawayn waqti horeba ah waxay hagaajin kartaa caafimaadka ilmahaaga kana hortagi karaa curyaannimo aad u daran amaba dhimashaba. Haddii adiga, aabaha ilmaha, ama xubin qoyska ah ay horeba u qabaan mid ka mid ah xaaladahan fadlan u sheeg xirfadlaha caafimaad markiiba.



### Ku saabsan xaaladahan Cudurka Sick cell

Qiyaastii 1 ee 2,000 ilmo ku dhashay waddanka UK waxaa ku dhaca cudurka sickle cell (SCD). Kuwaasi waa cuduro dhiiga ah oo la kala dhaxlo oo khatar ah Waxay saameeyaan haemoglobin, qayb ka mid ah dhiigga ee u kala qaada ogsijiin qaybaha jirka. Ilmaha qaba xaaladahan waxay u baahan yihiin daryeel dhakhtar takhasus noloshooda oo idil.

Dadka qaba SCD waxaa ku dhici kara weerar xanuun aad u daran, cudurro nafta halis ku ah iyagoo caadiyan ah anaemic (jirkooda waxaa ku adag qaaditaanka ogsijiinka). Ilmaha qaba SCD waxay heli karaan daawayn waqti horeba ah, ay ku jirto tallaaliid iyo antibiyootiik, taasoo, ay weheliso caawinta waalidkooda, ka caawinaysa ka hortagga cudurro aad u dardarn una oggolaanaysa ilmaha inuu ku noolaado nolol caafimaad leh.

**Baaritaan dhibic dhiig ayaa lagu talinayaa maadaama ay badbaadin karto nolosha ilmahaaga**

### Cystic fibrosis

Qiyaastii 1 ee 2,500 ilmo ku dhashay waddanka UK waxaa ku dhaca cystic fibrosis (CF). Xaaladdan la kala dhaxlo waxay saamaysaa dheefshiidka sambabada. Ilmaha qaba CF waxaa laga yaabaa inuusan miisan fiican fuulin, uuna mar kasta ku dhaco cudur xabadka ah.

Ilmaha qaba CF waa la daawayn karaa waqti horeba iyadoo la siinayo cunto leh tamar-saraysa -high-energy, daawooyin iyo ku-daawayn jismiyeed- physiotherapy. In kasta oo carruurta qabta CF ay weli aad u xanuunsan karaan, hore u daawayn waxaa loo arkay inay ka caawinayso inay sii noolaadaan wax badan , nolol caafimaad leh.

### Congenital hypothyroidism

Qiyaastii 1 ee 3,000 ilmood khu dhashay waddanka UK waxaa ku dhaca congenital hypothyroidism (CHT). Ilmaha qaba CHT ma haystaan in ku filan oo hoormoonka hormone thyroxine. La'aanta hoormoonka thyroxine ilmuhu uma korayaan si fiican waxaana ku dhici kara dhibaatooyin jismi aad u daran oo joogto ah iyo kala-dhantaalnaan waxbarasho (learning disabilities). Ilmaha qaba CHT hore ayaa loo

daawayn karaa iyadoo la siinayo kiniiniyada thyroxine iyadoo tani u oggolaanayso inay caadiyan u koraan.

### **Cudurada la dhaxlo ee metabolic - Inherited metabolic diseases**

Waa muhiim inaad u sheegto xirfadlahaaga caafimaad haddii aad qabto taariikh qoys ee xaaladda metabolic.

Ilmaha waxaa laga baaraa lix cudurro la kala dhaxlo oo metabolic (IMDs). Waxayna yihiin:

- phenylketonuria (PKU)
- medium-chain acyl-CoA dehydrogenase deficiency (MCADD)
- maple syrup urine disease (MSUD)
- isovaleric acidaemia (IVA)
- glutaric aciduria type 1 (GA1)
- homocystinuria (pyridoxine unresponsive) (HCU).

Qiyaastii 1 ee 2,500 ilmo ku dhashay waddanka UK waxaa ku dhaca PKU or MCADD. Xaaladahan kale ma badna, iyagoo ku dhaca 1 ee 10,000kii ilmood ilaa 1 ee 150,000kii ilmood.

Ilmaha qaba xaaladahan la kala dhaxlo ma dheefshiidi karaan qaabab cuntada ku jira. Daawayn la'aanta ilmaha qaba xaaladahan waxay ku keeni kartaa xanuun degdeg ah oo aad u daran. Calaamadaha xaaladaha waa kala duwan yihiin; qaar waxay ahaan karaan kuwa nolosha khatar ku ah ama keeni karaan samaysanka dhibaatooyin aad u daran. Waxaa dhammaantood lagu daawayn karaa cunto si taxadar leh loo miisaamay cunideeda, taasoo ku kala duwan xaalad kasta iyadoo lagu dari karo daawooyin dheeraad ah.

**Macluumaadka lagu aruuriyo kaarka dhibicda dhiig ee ilmahaaga waa muhiim – xaqiiqso in dhammaan faahfaahinuhu sax yihiin**

### **Muxuu uga kooban yahay baaritaanku ilmahaaga?**

Markii ilmahaagu jiro shan maalmood xirfadle caafimaad ayaa ilmaaga dhiig uga qaadaya aalad gaar ah oo kaar lagu dul marinyo dhiigga. Mararka qaar tani waxay ahaan kartaa shan maalmood kaddib. Aaladda dhiiga lagu qaadayo ma laga heli karo iyadoo ilmahaagu uu ooyi karo. Waxaad ku caawin kartaa adigoo xaqiijinaya inay diiranaadaan oo ay caadi yihiin, adigoo haynaya oo quudinaya.

Mararka qaar, baaritaan dhibic dhiig labaad ayaa mar kale loo baahdaa, haddii ay sidaas dhacdana sababta waa la sharaxaa. Mararka qaar, baaritaan dhibic dhiig labaad ayaa mar kale loo baahdaa, haddii ay sidaas dhacdana sababta waa la sharaxaa. Macnaheedu ma ahan in wax ka qaldan yihiin ilmahaaga.

### **Miyuu baaritankani dhibaataynayaa ilmahaaga?**

Ma jiraan khataro la ogyahay oo la socda samaynta baaritaankan.

### **Miyuu ilmahaygu u baahan yahay samaynta baaritaankan?**

Ka baaritaanka ilmahaaga ee dhammaan xaaladahan ayaa lagu talinayaa laakiin ma ahan qasab. Waxaad dooran kartaa samaynta baaritaanka ee SCD, CF ama CHT mid mid laakiin waxaad dooran kartaa samaynta baaritaanka dhammaan lixda IMDs ama midna gebi ahaan ma samaynaysid. Haddii aadan doonayn in ilmahaaga laga baaro mid ka mid ah xaaladahan, fadlan kala hadal arrintan umulisadaada.

### **Ilmahaygu ma heli karaa baaritaanka mar dambe haddii aan badalo maankayga?**

Haa. Haddii aad go'aankaaga badasho, ilmaha waxaa la baari karaa ilaa 12 bilood jor ee dhammaan xaaladaha marka laga reebo CF (kaliya ilaa siddeed usbuuc jir). Haddii aad wax walaac ah ka qabto arrinta baaritaanka fadlan kala hadal xirfadlahaaga caafimaad.

### **Maxsuullada macquulka ah**

Inta badan ilmaha waxay heli doonaan maxsuullo caadi ah, taasoo muujinaysa inay yar tahay inay qabaan mid ka mid ah xaaladahan. Tiro yar oo ilmaha ah ayaa laga helaa inay qabaan mid ka mid ah xaaladahan. Tani macnaheedu ma ahan inay qabaan xaaladda laakiin waxay u badan tahay inay ku dhacdo. Waxaa loo gudbin doonaa dhakhtar takhasus, baaritaan dheeraad ah.

Baaritaanka cystic fibrosis waxaa lagu helaa qaar carruurta ah oo laga yaabo inay yihiin cudur hidde-sidayaal . Ilmahani waxay u baahan karaan baaritaan dheeraad ah. Baaritaanku ma sheego dhammaan cudr-sideyaasha.

Mararka qaar, xaalado caafimaad kale ayaa lagu aqoonsadaa baaritaanka eegidahan. Tusaale ahaan, ilmaha qaba beta thalassaemia major (cudur dhiig aad u daran) ayaa caadiyan la aqoonsadaa. Carruurtani waxay sidoo kale u baahan yihiin in loo gudbiyo daawayn iyo daryeel noloshooda oo dhan abadiyan ah.

Baaritaanka cudurka sickle cell wuxuu sidoo kale helaa ilmaha ah sideyaal dhaxal ee kuwan ama cudurada kale ee dhiigga cas. Cudur-sideyaashu waa caafimaad qabaan in kasta oo ay la kulmi karaan dhibaatooyin xaaladaha uu dhiigoodu uusan qaadi karin ogsijiin ku filan, tusaale ahaan haddii ay qabaan suuxin .

### **Helitaanka maxsuulladayda**

Waa inaad maxsuullada ka heshaa xirfadle caafimaad waqtiga ilmahaagu uu jiro lix ilaa siddeed usbuuc. Maxsuullada waa in lagu diiwaan geliyaa diiwaanka caafimaadka ilmaha qof ahaaneed (personal child health record ('buugga cas - red book')). Fadlan tan ku xafid meel ammaan ah adigoo soo qaadanaya ballamaha dambe.

Waa lagula soo xiriiri doonaa markiiba haddii loo maleeyo inuu jiro wax dhibaato ah oo ilmahaaga la xidhiidha.

## **Maxaa ku dhacaya kaarka dhibic dhiig ee ilmaha iyo macluumaadka kaddib baaritaanka?**

Kaddib baaritaanka kaararka dhibic dhiig waxaa la kaydiyaa ugu yaraan shan sano waxaana loo isticmaali karaa:

- si loo eego maxsuulka ama baaritaannada kale ee uu ku taliyay dhakhtarkaagu
- si loo hagaajiyo barnaamijka baaritaanka
- cilmi-baaris ahaan si loo hagaajiyo caafimaadka ilmaha iyo qoysaskooda ee waddanka UK.

Cilmi-baaristani ma aqoonsanayso ilmahaaga, lagulana soo xiriiri maayo. Isticmaalidda dhibcahan dhiigga ah waxaa maamula nidaamka anshaxa hawleed ee laga helayo umulisadaada, ama bogga internet-ka.

Waxaa jira fursad yar oo cilmi-baarayaashu ay kugu casuumi karaan adiga iyo ilmahaaga ka qayb qaadashada cilmi-baaris la xiriirta barnaamijka baaritaankan. Haddii aadan doonayn in lagugu casuumo ka qayb qaadashada cilmi-baarista, fadlan la socodsii umulisadaada.

Waxaa sidoo kale muhiim ah oggaanshaha in macluumaadka la aqoonsan karo ee ilmaha ay saameeyeen cudurrada sickle cell ama thalassaemia loo isticmaali karo qiimaynta iyo hagaajinta baaritaanka. Haddii aadan doonayn in macluumaadka baaritaanka ilmahaaga loo isticmaalo qaabkan, [www.gov.uk/newbornoutcomes-project-definition-and-implementation](http://www.gov.uk/newbornoutcomes-project-definition-and-implementation). ama wac 0207 848 6627.

Daabacaadda koowaad

Oktoobar 2014

La sameeyay

Apriil 2016

Wagtiga dib-u-eegidda

Oktoobar 2016

Tixraac

1014ANPL

© Xuquuqda Daabacaad



6

YDib ayaad u isticmaali naadkan (laga saaray calaamadaha) si bilaash ah ee qaab kasta ama aalad kasta, iyadoo la raacayo Laysanka Furan ee Xukuumadda (Open Government Licence) v3.0. Si aad u eegto laysanka, booqo OGL ama iimayl [psi@nationalarchives.gsi.gov.uk](mailto:psi@nationalarchives.gsi.gov.uk).

Cinwaanka bogga internet-ka-ka

[www.gov.uk/topic/population-screening-programmes](http://www.gov.uk/topic/population-screening-programmes)

Sawir qaade

Looga mahadcelinayaa Hay'adda Down's Syndrome Association oggolaanshaha isticmaalka masawirrada bogga 12. Masawirada dokumentigaan ee la isticmaalay iyadoo la raacayo laysanka ma quseeyaan Laysanka Furan ee Xukuumadda. La xiriir haystaha/yaasha xuquuqda daabacaadda si oggolaansho looga helo wixii isticmaal dheeraad ah.